CHOC

# TILMAAMAHA CODSIGA KAALMADA DHAQAALE

**FADLAN XASUUSNOOW: Foomkani maaha Codsiga Barnaamijka California Medi-Cal ( California Medi-Cal Program)**

Isbitaalka Carruurta ee Degmada Orange (Children's Hospital of Orange County, CHOC) waxay u baahan tahay codsiga lifaaqa ku jira, oo lagu ladhay dukumeentiyada taageeraya ee hoos ku taxan si ay si habboon u qiimeeyso codsigaaga ku aadan in lagaa dhimi karo kharashaadka isbitaalka / dhakhtarka ee aad ku gashay CHOC ee Orange, CHOC ee Mission Hospita, rugta caafimaadka CHOC, ama goobaha Daryeelka Aasaasiga ah ee CHOC.

Fadlan dhammeystir dhammaaan qaybaha codsiga. Dukumeentiyada lagu qoray inay waajib yihiin waa in la soo raaciyo codsiga. Codsi kasta oo macluumaad ka maqan yahay ama la soo gudbiyaya iyadoo aanay la socon dukumeentiyadii loo baahnaa waa lagugu soo celin doonaa.

**FIIRO GAAR AH: DUKUMEENTIYADA SOO SOCDA AYAA LA ISKA RABAA.**

**Dukumeentiyadan waa in la soo gudbiyaa iyagoo la soo raacinaayo Codsigaaga Kaalmada Dhaqaale.**

**Labada (2) waraaq mushahar ee kuugu dambeeyay**
**Canshuur celisyadii federaalka ee sannadkii la soo dhaafay**

Fadlan bixi dukumeentiyada taageeraya ilaha dakhli ee kale ee soo socda oo uu ku jiro:

Dakhli Ganacsi (qof isagu isu Shaqeeya)
Dakhli Kiro
Masruufka Ilmaha
Lacagta Ilmaha ee
Sooshal Sekyuurati
Dheefaha Shaqo La'aanta
Magdhowga Shaqaalaha
Waalidku Baxsho / Kaalmada Qoysaska Haysta Carruur Naafo ah (AFDC)

**Haddii aanay jirin wax dakhli ah oo ku soo gala, ama aadan hayn dukumeentiyada caddaynta dakhliga, fadlan keen warqad sharraxaysa sida aad naftaada/qoyskaaga u biisho.**

**Fadlan iimayl u dir FinancialAssistance@choc.org si aad u hesho iimayl xafidan oo aad ku soo gudbiso codsigaaga iyo dukumeentiyada taageeraya.**

Codsiga la dhammeystiray waxa sidoo kale boosto ahaan loogu diri karaa:

CHOC
CHOC Family Payment Center
1201 W. La Veta Ave
Orange, California 92868-3874

Tilmaamaha dhaqangashan ee saboolinimada federaalka ayaa loo adeegsan doonaa go'aaminta u qalmitaanka. Siyaasadda Kaalmada Dhaqaale ee CHOC markii la codsado ayaa la heli karaa. Haddii aad rabto inaad la xiriiro isbitaalka oo kala hadasho codsigaaga, fadlan xarunta Ilaha Dhaqaale ee Qoyska ee CHOC ka wac lambarka 714-509-8600.

Waad ku mahadsan tahay inaad CHOC u xulatay baahiyaha daryeelka caafimaadka ee qoyskaaga.

**Macluumaadka bukaanka**

| | | |
|---|---|---|
| Magaca Bukaanka: | | |
| Jinsiga: Lab ☐ Dheddig ☐ | | Lambarka Koontada: |
| Taariikhda Dhalashada Bukaanka: | | Taariikhda(aha) Adeegga: |
| Magaca Dammaanad-qaadaha: | | |
| Ciwnaanka: | | |
| Bukaanku ma haysataa caymis caafimaad? Haa Maya | | |
| Bukaanku miyuu codsaday Medi-Cal ama CCS? Haa Maya | | |
| Tirada Xubnaha Qoyska / Dadka kugu tiirsan ee Canshuurta Dakhliga loo (ku dar dhammaan carruurta jira 21 iyo wixii ka yar) | | Da'da Xubnaha Qoyska: |

**Macluumaadka Dakhliga**

| Macluumaadka Waalidka / Dammaanad-qaadaha | Macluumaadka Shaqaaleysiiyaha | Dakhliga Billaha ah (Dakhliga Canshuurta KA HOR) |
|---|---|---|
| Magaca Waalidka #1 | Magaca Shaqaaleysiiyaha: | |
| | | $ |
| Magaca Waalidka #2: | Magaca Shaqaaleysiiyaha: | |
| | | $ |
| Dakhliga Kale: | Isha Dakhliga: | |
| | | $ |
| | | $ |

**Dakhliga Sannadlaha ah: $**

Waxaan qirayaa in macluumaadka aan bixiyay run iyo sax yahay inta ogaalkay ah. Waxaan haystaa ama waan codsan doonaa kaalmo kasta (Medi-Cal, Healthy Families, caymis, iwm.) ee laga yaabo inay bixiyaan kharashka adeegyada caafimaadka oo waxaan qaadi doonaa wixii tallaabo ah ee lagama maarmaan ah si aan u helo kaalmadaas oo waxaan isbitaalka u qoondayn doonaa ama siin doonaa qaddarka lacagta ee laga soo celiyay adeegyada caafimaadka.

Waxaan fahamsanahay in codsigani yahay agab uu isbitaalku ku qiimeyn doono u qalmitaanka kaalmada dhaqaale. Waxaan sidoo kale fahamsanahay in isbitaalku uu xaqiijin doono macluumaadka oo ay dhici karto inay raadiyaan xogta taariikhdayda daynta. Haddii macluumaadka aan bixiyay run noqon waydo, ama haddii aan ku fashilmo inaan u hogaansamo nidaamka gudbinta ee Medi-Cal, Medicare, California Children's Services, ama barnaamijyada kale ee la magacdhabo tani waxay dhalin kartaa in laigala laabto xuquuqda.

| | |
|---|---|
| Saxiixa: | Taariikhda: |
| Magaca: | Lambarka Xiriirka: |
| Iimayl: | |